

Suurat Al-Bayyinah

سُورَةُ الْبَيِّنَاتِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Ma aha Kuwii Gaaloobay ee ahaa ehlu kitaabka (Yahuud iyo Nasaara) iyo Gaaladii kuwo ka taga (xumaanta) intuu uga yimaaddo wax cad (xuja ah).

2. Oo ah Rasuul Eebe oo akhriyi Kutub daahir ah.

3. Oo xukun fiicani ku yaal.

4. Mana kala tagin Gaalada ehlu Kitaabka ah intuu uga yimaaddo xaq cad (xasad dartiis).

5. Dadkana waxaan Eebe caabu-diddiisa ahayn lama farin iyagoo u kali yeeli Eebe Diinta, toosanna, Salaaddana oogi Zakadana bixin, Saasina waa diinta toosan.

6. Kuwa Gaaloobay oo ehlu Kitaabka ah iyo Gaaladii waxay gali Naarta Jahannama ayna ku waari dhexdeeda, kuwaasina waa kuwa ugu sharbadan khalqiga.

7. Kuwa rumeeyayse xaqa Camal-fiicanna falay kuwaasi waa kuwa ugu khayr badan khalqiga.

8. Abaalkooda ay Eebe agtiisa ku leeyihiin waa Jannooyin Nagaadi, dhexdeedana ay dureeri Wabiyaal ay kuna waari dhexdeeda waligood, Eebaa ka raalli noqday iyana way ka raali

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

لَمَّا كُنِيَ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ وَالْمُشْرِكِينَ مُنْفَكِينَ حَتَّى تَأْتِيَهُمُ الْبَيِّنَةُ ﴿١﴾

رَسُولٌ مِنَ اللَّهِ يَتْلُو صُحُفًا مُطَهَّرَةً ﴿٢﴾

فِيهَا كُنُفٌ قِيمَةٌ ﴿٣﴾

وَمَا تَفَرَّقَ الَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ إِلَّا مِنْ بَعْدِ

مَآجَأِ نُهُمُ الْبَيِّنَةُ ﴿٤﴾

وَمَا أُمِرُوا إِلَّا لِيَعْبُدُوا اللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ حُنَفَاءَ

وَيُقِيمُوا الصَّلَاةَ وَيؤْتُوا الزَّكَاةَ وَذَلِكَ دِينٌ

الْقِيمَةُ ﴿٥﴾

إِنَّ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ وَالْمُشْرِكِينَ

فِي نَارِ جَهَنَّمَ خَالِدِينَ فِيهَا أُولَئِكَ هُمْ شَرُّ الْبَرِيَّةِ ﴿٦﴾

إِنَّ الَّذِينَ ءَامَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ أُولَئِكَ

هُوَ خَيْرُ الْبَرِيَّةِ ﴿٧﴾

جَزَاءُ لَهُمْ عِنْدَ رَبِّهِمْ جَنَّاتُ عَدْنٍ تَجْرِي مِنْ تَحْتِهَا

الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمْ وَرَضُوا عَنْهُ

noqdeen, arrintaasna waxay u sug-naatay Ruuxii Eeba ka yaaba.

ذَٰلِكَ لِمَنْ حَسِبَ رَبَّهُ ۝۸

Suuraddu waxay Sheegi Xumaanta gaalada iyo inay Nabiga, Quraanka iyo xaqaba diidi xasad, kibir iyo xaq diidnimo, hase-yeeshee Diintu iyo wanaaggeeduba waa cadyihiin sida Maalintoo kale, Dadkuna waa Laba, Mu'min khayr badan oo Janna gali, iyo Gaal shar badan iyo xumaan oo Naar gali (Eeba ha naga koriyee).

Nabiguna wuxuu yidhi «Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee» «Yahuudi waxay u kala Tagtay kow iyo Toddobaatan Qaybood, nasaarana waxay u kala Tageen laba iyo Toddobaatan qaybood, ummaddanna waxay u kala tagi saddex iyo Toddobaatan qaybood, Dhammaanna naartay gali mid mooyeene» Waxay dheheen: Waa tee Rasuulkii Eebow? Wuxuu Yidhi: «Waa tan ku socota saan Nahay ani iyo Asxaabtayda». Al-Bayyinah (1-8).



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariiss guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Marka DHulka la gilgilo.
2. Dhulkuna soo bixiyo culayskiisii (wixii ku aasnaa).
3. Dadkuna (Gaaladuna) dhahaan maxay leedahay.
4. Maalintaas waxay ka sheekayn warkeeda.
5. Maxaayeeley Eebaa u waxyooday.
6. Maalintaas Dadku way soo bixi iyagoo kala tagsan (xagga Diinta iyo Camalkaba) si ay u arkaaan camalkooda.
7. Ruuxiise wax yaroo khayra fala wuu arki.
8. Kiise wax yar oo shar ah fala wuu arki.

إِذَا زُلْزِلَتِ الْأَرْضُ زِلْزَالَهَا ۝۱

وَأُخْرِجَتِ الْأَرْضُ أَثْقَالَهَا ۝۲

وَقَالَ الْإِنْسَانُ مَا لَهَا ۝۳

يَوْمَئِذٍ تُحَدِّثُ أَخْبَارَهَا ۝۴

بِأَنَّ رَبَّكَ أَوْحَىٰ لَهَا ۝۵

يَوْمَئِذٍ يَصْدُرُ النَّاسُ أَشْتَاتًا

لِيُرَوْا أَعْمَلَهُمْ ۝۶

فَمَنْ يَعْمَلْ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ خَيْرًا يَرَهُ ۝۷

وَمَنْ يَعْمَلْ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ شَرًّا يَرَهُ ۝۸

Qiyaamadu waa xaq sugan si Ruux walba looga abaal mariyo Camalkiisa, khayr Ruuxii fala wuu la kulmi. xumaan yar Ruuxii sameeyana wuu arki, Ruux walbana suu ka Diin yeesho yaa lugu abaal marin. Abuu-Hurayra waxaa laga wariyay inuu yidhi: Rasuulkii Eebe «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee» yaa akhriyay Aayaddan : (Maalintaas waxay ka sheekayn warkeeda) Wuxuuna yidhi: «Ma ogtihin warkeeda?» waxay dheheen Eebe iyo Rasuulkiisaa og, wuxuu yidhi: «Warkeedu waa inay ku marag kacdo Addoon kastaba wuxuu ku camal falay kor-keeda. iyadoo dhihi: wuxuu camal falay sidaa iyo sidaa, Maalin hebla iyo Maalin hebla, warkeedu wakaas». Waxaa wariyay Axmad iyo Tirmidi iyo Nasaai; Az-Zalzalah (1-8).